


Xeer Lh. 2.



**FAAFINTA**

**RASMIGA**

الرسمية

الجريدة

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA**

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 6-aad, 11, July, 2004  
Faafinta bil walba kasoo baxda

Lam. 7  
جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga Ah Ee Madaxtooyadda Dawlad Goboleedka Puntland  
Qiimuhu waa Sh/So. 10,000 lambar walba. **Rukunka Sanadkii** waa Sh/So. 170,000 dalka gudahiisa, dibada waa Sh/So 500,000 **Rukunka** La weydiisto Wakhtiga loo gooyay wuxuu ka bilowday 1 – da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R halkii Sadar iyo wixii ka yar waa Sh.so 3,000 **Rukunka** iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa qaybta maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

## TUSMADA

### Qaybta Kowaad

Sharci

Qaybta –Labaad

Xeer.


### Qaybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogeysiis IWM

Waxba Ma leh.

1. Sharci Lam. 2 ee 11/07/2004., kuna saabsan Xilli-hawleedka shaqo ee Golayaasha Puntland oo laga dhigay 6 Bilood oo ka bilaabata 07/07/2004, kuna eg 07/01/2005.
2. Xeer Lam. 01 ee 05/07/2004, kuna saabsan la dagaalanka mukhaadaraadka iyo caadooyinka xun xun.

**DAWLAD G.PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA  
Xafiiska Madaxweynaha**



**PUNTLAND STATE  
OF SOMALIA  
Office of the President**

*Xeer Sharci, June, 30, 2004 oo Baarlamaanku sharci u rogay, kaasoo ku saabsanaa xilli hawleedka shaqo ee Golayaasha Puntland oo laga dhigay 6 Bilood, sharcigaas oo noqday. Lam.2.*

**MADAXWEYNUHU**

**MARKUU ARKAY:**

*Dastuurka Dgpls.*

**Markuu Dersay:**

*Xaaladaha Guud Ee Dalku Ku Sugaan Yahay*

**MARKUU SAMEEYAY:**

*Wada tashi Ballaaran ee Ergadda shirka Qaran, dhammaan golayaasha Dawladda, Isimada, odayaasha iyo waxgaradka Puntland.*

**MARKUU TIXGELIYAY:**

*Jiritaanka, Xasiloonaada iyo midnimada Dawladda Puntlan sida ku cad dastuurka Qodobkiisa 54-aad ( 1).*

**WUXUU SOO SAARAY**

**Sharciga soo Socda:**

**QODOBKA 1-AAD**

*Xeer Sharci Madaxweyne, June, 30, 2004, Baarlamaanku wuxuu u rogay sharci, waana ansixiyey sida ku cad go'aanka Golaha wakiillada ee 07/07/2004.*

**QODOBKA 2-AAD**

*Saddexda Nuqul oo Madaxweynuhu saxiixay iyo lifaaqiisa waxaa loo qaadanayaa asal, Original, waxaana lagu kala kaydinayaa Xafiiska Xoghaynta Madaxtooyada, Xafiiska Golaha Wakiillada iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud.*

**QODOBKA 3-AAD**

*Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa 07/07/2004, asagoo lagu soo saarayo faafinta rasmiga ah ee Dawladda, sharcigan oo kamid noqonaya sharciyadda Puntland, qof kastana waxaa ku waajib ah inuu dhawro kuna dhaqmo.*

*Cabdulaahi Yuusuf Axmed*



54

**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada DGPL.**

MARKUU ARKAY:- Dastuurka DGPL

MARKUU ARKAY:- Mooshinka Golaha Xukuumada ka yimi ee xeer no:-  
MW/DPS/XEER300604/2004 Taariikh 30/06/04

MARKUU ARKAY:Dhimista Golaha Wakiilada ee mudada labada sano ahayd

MARKUU ARKAY:-Ansaxinta Golaha Wakiilada ee Xeer No:-


MW/DPS/XEER/300604/2004

MARKUU TIXGALIYEY:- Daruufaha jira.

**WUXUU GUDOOMIYEY.**

In xili howlood koodii laga dhigay lix bilood (6) sadexda Gole ee  
Dowladaba oo ka bilaabanta 07/07/04 kuna eg 07/01/05.

Wabilaahi Towfiq.

  
Yuusuf Xaaji Saciid.  
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada DGPL.

